# TAAGEERADA WAXBARASHADA [STUDIESTÖD] LOOGU TALAGALAY ARDAYDA DALKA ISWIIDAN

waa warbixin loogu talagalay ardayda jinsiyad shisheeye haysto

CSN FAKTABLAD SOMALISKA

*Qoraal-warbixineedkaan waxaad ka aqrisan kartaa nooca jinsiyadaha shisheeye oo xaq ku leh qaadashada taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] ] dalka Iswiidan (studiehjälp, lärlingsersättning, studiestartsstöd iyo studiemedel) wax ku barashada dalka Iswiidan. Ka feker in warbixinta qoraal-warbixineedkaan ku qoran ay tahay mid guud oona aynan ahayn qodobada sharciyada.*

**Taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] ee dalka Iswiidan**
Sidii loo helo taageero-dhaqaaleed iyo daynta waxbarashada ee Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] awgood waa inaad buuxuin karto laba shuruudood:

1. Shuruudaha xaq u yeelashada taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] ee dalka Iswiidan qofka jinsiyad dal kale ka haysto. Shuruudaha waxaad buuxin kartaa hab waafaqsan xeerarka dalka Iswiidan ama Isbahaysiga Yurub u degsan.
2. Shuruudaha xiriirka la leh taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] oo aad codsan doonto. Shuruudahaas waxaa ka arrinsan doonto Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN], kaddib markii la qiimeeyo haddii adiga oo ah qofka jinsiyad dalka ka haysto, xaq u leedahay taageero-waxbarashadeedka [studiestöd].

**YAA XAQ U LEH SIDA HADBA WAAFAQSAN XEERARKA DALKA ISWIIDAN?**
Waxaad xaq ugu lahaan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] ee dalka Iswiidan haddii aad dalka Iswiidan degan tahay oona buuxin karto mid kamid qodobada shuruudaha hoos ku xusan:

**Haddii aad haysato ruqsadda degenaanshada ee joogtada ah (PUT)**
Haddii Hey'adda Socdaalka aad ka haysato ruqsadda degenaanshada ee joogtada ah (PUT), waxaad xaq ugu lahaan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] ee dalka Iswiidan.

**Haddii qaxooti siyaasi [flyktingstatus] ama xaalad la mid ah laguga aqoonsaday dalka Iswiidan**
Haddii Hey'adda Socdaalka [Migrationsverket] ay ku aqoonsatay inaad tahay qaxooti, qof u baahan in la badbaadiyo ama ruqsadda degenaanshada/sharciga lagugu siiyay sabab xaalad la mid ah, xaaladdaas waxaad xaq ugu lahaan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd]. Ama haddii aad tahay ehelka qoflaas. Waxaa dhici karto in xaaladaha qaarkood aad xaq u leedahay taageero-waxbarashadeedka [studiestöd], waa haddii lagu siiyay ruqsadda degenaanshada, taasoo Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] is barbardhigtay tan qaxootida. Xaaladdaas qiimayntaan waxay ku salaysan tahay qiimaynta Hey'adda Socdaalka oo arrintaada ku qiimeeyay ama sharciga kugu siisay maadaama xaaladaada lagu qiimeeyay sabab la bardhigi karo tan qaxootida. Haddii aad tahay magangeliyo-doone xaq ugu ma lihid taageero-waxbarashadeedka [studiestöd].

**Waxaad haysata ruqsadda degenaanshada/sharciga taasoo waafaqsan sharciga dugsiyada sare ee cusub ama waafaqsan sharcigii berri hore ee kumeelgaarka ahaa**
Haddii Hey'adda Socdaalka ay ku siisay ruqsadda degenaanshada/sharciga, taasoo waafaqsan sharciga dugsiyada sare ee cusub ama waafaqsan sharcigii berri hore ee kumeelgaarka ahaa, waxaad xaq ugu lahaan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd].

**Haddii ruqsadda degenaanshada/sharciga lagu siiyay xiriir qoyseed awgiis**
Haddii berri hore aad haysan jirtay ruqsadda degenaanshada/sharciga, kaasoo dartiisa xaq ugu lahayd taageero-waxbarashadeedka [studiestöd], oo laakinse imminka ka dhacay, inkastoo sidaas tahay waxaad haddana xaq u leedahay taageero-waxbarashadeedka [studiestöd]. Laakinse waa haddii aad codsatay in lagu cusboonisiiyo ruqsadda degenaanshada/sharciga kahor inta ruqsadda

## Yaaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] ee dalka Iswiidan xaq ku leh?

Taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] waxay noqon kartaa [studiehjälp, lärlingsersättning, studiemedel ama studiestartsstöd]. Halkaan hoos ayaa lagu qeexayaa sida ay u kala duwan yihiin. Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan kartaa barta internetka www.csn.se.

**CAAWINAADDA WAXBARASHADA [STUDIEHJÄLP]**
Caawimaad waxbarashada [studiehjälp] waxaa loogu talagalay ardayda wax ku barato dugsiyada sare, dugsiyada ssare ee dadka waawayn loogu talagalay ama kulliyadaha. Ardayda waxay Caawinaadda waxbarashada [studiehjälp] qaadan karaan ilaa ay 20 sano ka buuxsadaansano.

**GUNNADA TABABARTEHA [LÄRLINGSERSÄTTNING]**
Gunnada tababarthea [lärlingsersättning] waxaa loogu talagalay ardada dhigta dugsiyada sare tababarka tababarteha. Ardayda wuxuu Gunnada tababarteha [lärlingsersättning] qaadan karaan ilaa xilliga gu`ga oo ay 20 sano ka buuxsadaan.

**DEQDA/DEYNTA WXBARASHADA [STUDIEMEDEL]**
Deqda/deynta waxbarashada [studiemedel] waa taageero-dhaqaaleed iyo dayn oo u ardayga codsan karo markii u dhiganayo kuliyadaha shicibka, iskuullada dadka waawayn, kuliyadaha xirfadda, kuliyadaha ama jaamacad. Ardayga wuxuu dooran karaa kaalmo-dhaqaaleedka oo keliya ama iyo kaalmo-dhaqaaleedka iyo dayn.

**TAAGEERADA BILAABITSA WAXBARASHADA [STUDIEARTSSTÖD]**
Taageerada waxbarashada [studiestartsstöd] waa kaalmo-dhaqaaleedka loogu talagalay shaqolaaaweyaaasha qaakood, oo ay muddo gaaba qaadaan kaaraan wax ku barashada iskuullada sare oo kordhisa helista shaqada. Maamulka Dowladda hoose ee degmada ayaa qiimeeya kooxaha la siiyo taageerada bilaabista waxbarashada. Isla maamulkaas ayaa taageerada laga codsada.

CSN nr 4146O/2110/översättning av 4146A-2110

degenaanshada/sharciga ee kumeelgaar ah ka dhicin.
Laakin waa in codsiga cusub

• u leeyahay isla gundhiggii berri hore

*ama*

• ruqsadaa cusub waafaqsan tahay sharciga dugsiga sare ee cusub.

**Qof jinsiyadda dalka Iswiidan ka haysto ayaa ilmo isku dhasheen**
Haddii qof jinsiyadda dalka Iswiidan haysto ilmo isku dhasheen oona wadajir dalka Iswiidan degan tihiin, waxaad xaq ugu lahaan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd]. Waa in xitaa aad haysato ruqsadda degenaanshada/sharciga ama aad xaq ugu leedahay joogitaanka dalka Iswiidan.
**Waxaad xaq ku leedahay joogitaanka dalka Iswiidan ama xiriir joogto ayaa dalka Iswiidan ku leedahay**
Haddii aad xaq ku leedahay joogitaanka dalka Iswiidan ama xiriir joogto aad dalka Iswiidan ku leedahay, waxaad xaq ugu lahaan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd]. Joogitaanka dalka ayaa xaq u lahaan kartaa haddii

• jinsiyad aad ka haysato Is-bahaysiga dalalka Midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein ama Switzerland

• qaraabo aad tihiiin qof jinsiyad ka haysto Is-bahaysiga dalalka Midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein ama Switzerland (caadi ahaan aan jinsiyadda dalka Iswiidan haysan)

• qaraabo aad tihiiin qof jinsiyad ka haysto dalka Iswiidan, oo aad wada noolaan jirteen ama xiriir aad la lahaan kirtay qof jinsiyad ka haysto Is-bahaysiga dalalka Midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein ama Switzerland.

Inaad xiriir joogto ah aad dalka Iswiidan ku leedahay

• haddii ugu yaraan laba sano ku nooleed kana shaqaysan jirtay dalka Iswiidan

• haddii da`daada ay ka hooseysay 20 sano markii aad dalka Iswiidan u soo guurtay, oona mid waalidiintaada kamid ah u degan kana shaqaysto dalka Iswiidan

• haddii aad isqabtaan ama la nooshahay qof jinsiyadda dalka Iswiidan haysto, muddo ugu yaraan afar sannaadood, oo ugu yaraan hal sano dalka Iswiidan ku nooleedeen.

• haddii aad isqabtaan ama la nooshahay qof jinsiyadda dalka Iswiidan haysto, muddo ugu yaraan afar sannaadood, oo ugu yaraan labo sano dalka Iswiidan ku nooleedeen.

• haddii aad isqabtaan ama la nooshahay qof jinsiyadda dalka kale ka haysto, muddo ugu yaraan laba sannaadood. Lamaanahaaga waa in uu ruqsadda degenaanshada/sharciga haysto kaasoo xaq taageero-waxbarashadeedka [studiestöd].

• aad is-qabtaan ama ka nooshahay qof jinsyad ka haysto Is-bahaysiga dalalka Midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein kaasoo buuxin kara shuruudaha xaq u yeelashada taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] hab waafaqsan xeerarka dalka Iswiidan.

Haddii aad dalka Iswiidan ka shaqayn jirtay waa inaad muddo laba sannadood soo shaqaysay nus wakhti. Shaqada waxay noqon kartaa

• shaqo dalka Iswiidan

• ganacsig dalka Iswiidan ka diiwaan gashan

• xannaanadda ilmohaaga oo aad weli tobban sano buuxsan

• aad Xafiiska Shaqada ka diiwaan gashan tahay inaad shaqo la`aan ahaan jirtay

• ka qaybgashay tababarka suuqa shaqada

• ka qaybgashay barashada luqada iswiidishka ee soo-gaaleetiga loogu talagalay (sfi)

• tababar ama waxbarashada af-iswiidishka heer Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe dalka Iswiidan, ugu yaraan nus wakhti

• aad qaadan jirta kaalmo-dhaqaaleedyada loo yaqaanno [sjukpenning, sjukersättning ama aktivitetsersättning].

**Haddii aadan weli 20 sano buuxsan**
Haddii weli aadan 20 sano buuxsan waxaad xaq ugu yeelan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] waa haddii ruqsadda degenaanshada/sharciga aad haysato ama aad xaq ugu leedahay joogitaanka dalka Iswiidan oona

• adiga iyo waalidiintaada ay xubin qoyseed ka yihiin qof jinsiyadda dalka Iswiidan haysto, ama qof buuxin karo shuruudaha xaq u yeelashada taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] hab waafaqsan xeerarka dalka Iswiidan.

• aad leedahay waalid jinsiyadda dalka Iswiidan haysto.

• hay`ad dalka Iswiidan kugu meeleeysay hoyga loo yaqaanno Hoyga qoysaska ama la mid ah.

• aad leedahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka kaasoo hay`ad dalka Iswiidan ku magacaawday.

**YAA XAQ U LAHAAN KARO HAB WAAFAQSAN SHURUUDAHA ISBAHAYSIGA DALALKA YURUB?**
Xuquuqdaada waxaa la barbardhigi karaa kuwa qofka jinsiyadda dalka Iswiidan haysto, haddii aad buuxun kato shuruudaha isbahaysiga dalalka yurub. Warbixin dheeraad ka aqriso halkaan hoos:
**Waxaa ka shaqaysaa ama ka shaqaysan jirtay dalka Iswiidan**
Qofka adigoo kale ah oo jinsiyad ka haysto dalalka Is-Bahaysiga Dalalka Midowga Yurub, Norway, Iceland Iyo Liechtenstein-land ama Schweiz, waxaad xaq ugu yeelan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd], haddii shaqo darteed ama ganacsade ahaan dalka Iswiidan ugu soo guurtay. Sidii lagugu qiimeeyo inaad tahay qof shaqo darteed ama ganacsade ahaan dalka Iswiidan ugu soo guuray, waa inaad wax badan soo shaqaysay. Taasoo macneheedu ay tahay inaad ugu yaraa 10 saacadood toddobaadkii soo shaqaysay. Tan kale, waa in isla heerkaas aad weli u shaqayso xilliga waxbarashada oona mushahar ama gunnad lagugu siiyo.
Haddii aad ganacsade tahay waa in ganacsiga shirkaddaada u dhaqaale ku salaysan yahay oona ka diiwaan gashan tahay Hay`adda canshuuraha.

Haddii aad shaqada joojisay, waxaad xaaladaha qaarkood xaq ugu lahaan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd]. Xaaladdaas waa inaad buuxin karto shuruudaha hoos ku xusan:

• Ku talo jirti aqoon-korsato isla laamaha xirfadda iyo waxbarashada xiriir la leeyihiin shaqada dalka Iswiidan. Waxbarashada waa in xirfad ay ku jihaysan tahay. Waa in aynan muddo dheer ka soo wareega tan iyo markii aad shaqada joojisay.

• In kumeelgaar ahaan aadan shaqaysan karin taasoo u sabab ah jirro ama shil.

• In shaqo la`aan kugu dhacday shaqadii dalka Iswiidan aad ka haysatay oona iska diiwaan gelisay shaqolaawe ahaan Xafiiska Shaqada dalka Iswiidan.

**Aad qaraabo tihiin qof jinsiyad ka haysto Is-bahaysiga dalalka midowga Yurub, Norway, Iceland iyo**

**Liechtenstein-land ama Schweiz oo dalka Iswiidan ka shaqaysto**

Waxaa qaraabo tihiin qof Is-bahaysiga dalalka midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein-land ama Schweiz (caadi ahayn qof jinsiyad dalka Iswiidan ka haysto) ka haysto, oo shaqaale ahaan ama ganacsade ahaan dalka Iswiidan u soo guuray, wuxuu xaq ugu yeelan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd]. Waxaa qaraabo ah

• sayga, xaaska, ama la noole

• ilmaha ama ilmaha la korsado oo aan weli 21 sano buuxsan

*Iyo xaaladaha qaarkood haddii aad tahay*

• qof dhaqaale ahaan waalidiintiisa ku ti-irsan.

Iyo Is-bahaysiga dalalka midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein-land ama Schweiz, waxaad xaaladaha qaarkood xaq ugu yeelan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd]. Xaaladdaas qaraabadaada waa in u dalka Iswiidan ka shaqaysto ama u ganacsade ka yahay dalka Iswiidan kaddib markii u muddo dalka dibadiisa ku noolaa.

**Waxaad xaq ku leedahay inaad hab joogto ah ku noolaato dalka Iswiidan (PUR)**

Haddii aad jinsiyad ka haysato Is-bahaysiga dalalka midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein-land ama Schweiz, waxaad xaq ugu yeelan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd], waa  xaq ku leedahay inaad hab joogto ah ku noolaato dalka Iswiidan (PUR). Haddii muddo shan sano aad dalka Iswiidan ku nooleed waxaad caadi ahaaan xaq ugu leedahay inaad hab joogto ah dalka Iswiidan ugu noolaato [PUR]. Haddii laf ahaaantaada aada jinsiyad ka haysan dalalka midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein-land ama Schweiz, waxaad xaq uhu lahaan kartaa inaad hab joogto ah dalka Iswiidan ku noolaato, haddii ugu yaraan shan sano aad dalka Iswiidan kula nooleed qof jinsiyad ka haysto dalalka midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein-land ama Schweiz kaasoo ahaa qof ehel ah. Ehel/qaraabo waxaa ah sayga, xaaska, la noole ama ilmaha.

**Waxaad leedahay sharciga deganaanshaha rasmiga ah**

Waxaad xaq ugu yeelan kartaa taageero-waxbarashadeedka [studiestöd] haddii Hey'adda Socdaalka ku siiyay sharciga deganaanshaha joogtada ah ee dalka Iswiidan. Sidoo kale waxaa dhici karto in lagugu qiimeeyo qof sharciga deganaanshaha rasmiga ah haysto haddii aad hab joogto ah ugu nooleed dal kamid ah dalalka Isbahaysiga Yurub, sidaas awgeed Hey'adda Socdaalka kugu siisay ruqsadda degenaanshada/sharciga dalka Iswiidan.

## Nidaamyada gaarka ah

Dadka jinsiyad Ingrisiga ka haysto ama qaraabadooda nidaamyo gaar ah ayaa khuseeyo. Sidoo kale nidaamyo gaar ah ayaa u degsan ilmaha cilmibaaareyaasha martida dalka Iswiidan ku ah, ilmha muwaatinyiinta dalka Turkiga oo dalka Iswiidan ka shaqaysto ama ilmaha dadka haysto kaarka buluugga ee Isbahaysiga Yurub ama ruqsadda ICT dalka Iswiidan. Warbixin dheeraad darteed Wwaa in ay la xiriiraan Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN].

**Waddamada EU waa**
Dalalka Belgium, Bulgaria, Cyprus, Denmark, Estonia, Finland, France, Greece, Ireland, Italy, Croatia, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Czech Republic, Germany, Hungary iyo Austria.

**Waddamada EES waa**
waddamada EU iyo Island, Liechtenstein och Norway.